Oregon Department of Human Services
OFFICE OF DEVELOPMENTAL DISABILITIES SERVICES

# Miisaaniyadda Guddoomiyaha uu Soo Jeediyay iyo Waaxda Xasilinta iyo Xasaradaha — Su'aalaha Inta Badan la Isweydiiyo

العربية اللغة | English | Español | Русский | Soomaali | 简体中文 | Tiếng Việt

La cusbooneysiiyay: Diseembar 13, 2024

## Waa maxay Miisaaniyadda Guddoomiyaha uu Soo Jeediyay (GRB)?

GRB waa soo jeedinta Guddoomiyaha Tina Kotek ee miisaaniyadda gobolka. Ma ahan miisaaniyad kama dambays ah. Guddoomiyaha ayaa shaaciyay GRB markay ahayd Diseembar 3, 2024.

Sharci-dejinta Oregon waxay isticmaalaan GRB si ay u bilaabaan qorshaynta miisaaniyadooda. Waxay go'aan ka gaari doonaan waxa ay miisaaniyadda gobolka noqon doonto. Tani waxa loo yaqaanaa Miisaaniyadda Sharci-dejinta la Ansixiyay (LAB). Waaxda Adeegyada Aadanaha ee Oregon waxay maalgelin doontaa LAB-ga soo socda laga bilaabo Luulyo 1, 2025, ilaa Juun 30, 2027.

## Miisaaniyadda uu Guddoomiyaha uu Soo jeediyay (GRB) miyay gooysay Waaxda Xasilinta iyo Xasaradaha?

GRB ma aysan soo jeedin in la xiro Qaybta Xasilinta iyo Xasaradaha. GRB waxaa ku jiray goynta qayb ka mid ah miisaaniyadda barnaamijka.

Guddoomiyuhu ma rabo inuu xiro barnaamijka. Waxay ka codsanaysaa Sharci-dejinta, Waaxda Adeegyada Aadanaha ee Oregon (ODHS) iyo

bulshada naafada garaadka iyo korriinka (I/DD) inay eegaan hadafka iyo adeegyada barnaamijka. Waxay naga doonaysaa inaan helno habab aan ku sii wanaajino barnaamijka. Waxay naga doonaysaa inaan hubinno in shakhsiyaadka ka tirsan barnaamijka ay helaan adeegyada iyo taageerada ugu fiican si ay u daboolaan baahidooda.

Shaqaalaha ODHS waxay maqleen sida uu warkani u cabsi galinayo qaar ka mid ah shakhsiyaadka iyo qoysaska. Suurtagalnimada isbeddelku way adkaan kartaa. Waanu ku taageeri doonnaa ilaa aad ka baxayso tan. Hadafkeenu weli waa badqabka, caafimaadka iyo fayo-qabka dhammaan dadka jooga Qaybta Xasilinta iyo Xasaradaha.

### Miisaaniyadda miyay tahay mid go'aan laga gaaray? Miyay kama dambays tahay Miisaaniyadda uu Guddoomiyaha  Ku Taliyay (GRB)?

**Miisaaniyadda go’aan lagama gaarin.** Sharci-dejinta ayaa gaari doonta go'aannada miisaaniyadeed ee kama dambaysta ah. GRB waxay soo jeedisay talooyin si loo bilaabo geedi-socodka miisaaniyadda.

### Maxay hadda kaga dhigantahay Miisaaniyadda Guddoomiyaha ku Taliyay (GRB) ee ku aadan adeegyada shakhsiyeed? Hadda miyay xirmaysaa Qaybta Xasilinta iyo Xasaradaha?

Maya. Barnaamijka ma xirmayo. Adeegyada hadda isma beddelayaan.

Waxaan maqalnay warar xan oo ah in barnaamijku uu hadda ka xirmayo dhammaan guryaha. Tani run ma ahan.

**Waa kuwan xaqiiqooyinka:**

- **Ma jiraan wax isbeddelo ah oo hadda dhici doona. Waxaan wax badan ogaan doonnaa sannadka soo socda kadib kalfadhiga Sharci-dejinta.**
- **Barnaamijku wuxuu wali u heellan yahay inuu adiga ama qofka aad jeceshahay idiinka dhigo kuwa caafimaad qabo, badqabo, faraxsan iyo la taageero.**
- **Waxaad adiga ama qofka aad jeceshahay sii wadan doontaan helitaanka adeegyo isku mid ah.**

## Maxay uga dhigan tahay Miisaaniyadda Guddoomiyaha ku Taliyay (GRB) ee mustaqbalka Qaybta Xasilinta iyo Xasaradaha?

GRB **ma goynayso** adeegyada iyo taageerada loogu talagalay shakhsiyaadka. GRB waxay ka codsanaysaa Sharci-dejinta, Waaxda Adeegyada Aadanaha ee Oregon (ODHS), iyo bulshada garaadka iyo korriinka ee gobolka (I/DD) inay qiimeeyaan barnaamijka. Tani waxay ka dhigantahay ka doodista hadafka iyo qaab-dhismeedka barnaamijka. GRB waxay naga codsanaysaa in aanu samayno qorshe:

- Dib diirada u saara barnaamijka qaybta xasilinta muddada gaaban.
- Lagu ogaado tirada guryaha si tan loo sameeyo.
- Xoojiya barnaamijka si aanu u bixino adeegyo la horumariyay, udub-dhexaad u ah qofka si shakhsiyaadka looga caawiyo inay si fiican ugu noolaadaan bulshooyinkooda dhexdooda.

Qaar ka mid ah su'aalaha lagu bilaabayo wada-hadaladan waa:

- Sidee ugu wanaagsan ayaan u taageeri karnaa shakhsiyaadka dhibaataysan?
- Sidee ugu wanaagsan ayaan uga taageeri karnaa inay bulshadooda ku noqdaan marka ay gabi ahaan ku jirin wax dhibaato ah?
- Sidee ugu wanaagsan ayaan uga taageeri karnaa shakhsiyaadka marka ay dib ula noolaanayan bulshadooda?
- Sidee ugu wanaagsan ayaan shaqaalaha u siin karnaa awood ay ku sameeyaan waxyaabaha sare?
- Sidee ayaan uga caawin karnaa bixiyeyaasha inay ku bixiyaan taageerooyinka xasaradda ee goobaha guryaha iyo bulshada ku salaysan?
- Sidee ayaan bixiyeyaasha uga caawin karnaa inay u taageeraan shakhsiyaadka marka ay dib ula noolanayaan bulshadooda?
- Sidee ayaan ugu fidin karnaa adeegyada xasaradda shakhsiyaadka ka tirsan bulshooyinka ku nool gobolka oo dhan? Waqti xaadirkan, taageerooyinkan waxaa laga heli karaa oo kaliya Portland ilaa Eugene.

GRB waa bilowga wada-hadalkan.

## Waa maxay tallaabooyinka xiga ee geedi-socodka miisaaniyadda? Sidee buu nidaamku wax uga qabanayaa Qaybta Xasilinta iyo Xasaradaha (SACU)?

Bisha Janaayo, Golaha Sharci-dejinta Oregon ayaa isku arkaya “Kulanka Muddada Dheer.” Tani waxay dhacdaa labadii sanaba mar. Sharci-dejintu waxa ay ka doodayaan Miisaaniyadda Guddoomiyaha Ku Taliyay (GRB).

Kalfadhigu wuxuu soconaaya ilaa Juun. Marka la gaaro wakhtigaas, Sharci-dejintu waxay ansixinayaan miisaaniyadda labada sano ee soo socota.

Geedi-socodkan waxaa ku jiri doona wada-hadal ku saabsan hadafka, adeegyada iyo miisaaniyadda Qaybta Xasilinta iyo Xasaradaha. Dad badan ayaa qayb ka noqon doona wada-hadaladan. Dadkani waxaa ka mid ah shakhsiyaadka ku jira SACU, mas'uuliyiintooda iyo qoysaskooda, iskood-u-doodayaasha, ururrada u-doodista, shaqaalaha SACU, midowyada xamaalatada, shaqaalaha iyo hoggaamiyeyaasha ku sugan Waaxda Adeegyada Aadanaha ee Oregon, shuraakadeena, iyo bulshada I/DD.

### Waa maxay waxa marka xigta qaban doonaa Xafiiska Adeegyada Naafada Korriinka (ODDS)?

Waxaan soo saari doonaa soo jeedin dib diiradda u saaraysa Qaybta Xasilinta iyo Xasaradaha ee barnaamijka waqtiga gaaban oo ka caawinaya shakhsiyaadka inay ku noqdaan bulshadooda. Ficiladayada waxaa ka mid noqon doona:

- Abuurista kooxda qorsheynta. Kooxdan waxaa ka mid noqon doona iskood-u-doodayaasha, shaqaalaheena, midowyada xamaalatada, hoggaamiyeyaasha sharci-dejinta iyo shuraakada bulshada.
- La shaqaynta kooxaha kor ku xusan si loo helo xal loona sameeoyo jadwal marka miisaaniyaddu noqoto mid cad.
- In lala wadaago wax ku saabsan geedi-socodkan dhammaan dadka ku nool ama ka shaqeeya qaybta SACU, mas'uuliyiinta, qoysaska, midowyada shaqaalaha, sharci-dejiyeyaasha, iyo bulshada I/DD.

## Goormee ayay bilaabanaysaa dhimista miisaaniyadda?

Miisaaniyadda go’aan lagama gaarin. Ma garanayno waxa ay sharci-dejintu samayn doonto. Haddii Golaha Sharci-dejinta ay aqbalaan miisaaniyad dhimista la soo jeediyay, waxay bilaabi doonaan Luulyo 2026. Haddii tani dhacdo, waxaan haysanaa waqti aan ku wada shaqeyno oo aan isku diyaarino.

## Waa kuwee Guryaha Xasilinta iyo Xasaradaha (SACU) ee hadda xirmaayo? Miisaaniyadda Guddoomiyuhu ku Taliyay (GRB) miyaa sababtay in guryahan la xiro?

Laba guri oo SACU ah ayaa hadda bannaan. Guryahani waxay xirmi doonaan markii la garoo Janaayo 31, 2025. Ma hayno xiritaan kale oo qorshaysan. GRB ma aysan saamayn xiritaannadan. Waxaan guryahan inaan xirno go'aansanay ka hor inta aysan GRB soo bixin.

Mid ka mid ah guryaha waa guriga Eliot 2 ee ku yaalla Portland. Dadka deggan gurigaas ayaa mar hore u guuray guriga xiga ee guriga Eliot 1. Waxaa jira qol ku filan oo ku yaalo Eliot 1 oo loogu talagalay dhammaan shanta qof ee ka socda labada guri. Waxaan gabi ahaan isku daraynaa labada guri. Waxaan tan u sameyneynaa maadaamaa shaqaalaha ay ka shaqaynayeen labada guri hal gelin oo isku mid ah. Inay dadka oo dhan iskula noolaadaan hal guri waxay shaqaalaha u oggolaanaysaa inay si wanaagsan ugu adeegaan shakhsiyaadka oo ay u ilaaliyaan ammaankooda.

Guriga kale waa Guriga Weirich oo ku yaalo Lubnaan. Dhismahani wuxuu u baahan yahay dayactir dhab ah. Shakhsiga kaliya ee halkaas ku noolaa

ayaa mar hore u guuray guri SACU oo u dhow. Waxaan go'aansanay inaan gabi ahaanba xirno Weirich, sababtoo ah waqtigan ma jirto wax baahi ah oo loo qabo gurigaas. Waxaa jira guryo kale oo SACU ah oo ku yaalo aagga halkaas oo shakhsiyaadka ay ka heli karaan adeegyo.

### Yay tahay cidda aan la xiriiraayo si aan u helo macluumaad iyo caawimaad dheeraad ah?

Waxaad la hadli kartaa isku-duwaha adeegyadaada.

Waxaad sidoo kale su'aalahaaga uga soo diri kartaa ODDS barta odds.questions@odhsoha.oregon.gov. Mid ka mid ah shaqaalaheena ayaa dib kuula soo xiriiri doona. Waxaan sidoo kale soo gelin doonnaa macluumaadka iyo khayraadyada, sida Su'aalahan Inta Badan La Isweydiiyo, bogga mareegta SACU.

---

Waxaad ku heli kartaa bilaash dhukumeentigaan isagoo luuqado kale ku qoran, ku qoran far waawayn, qoraalka indhoolayaasha ama qaabka aad jeceshahay ku qoran. Kala xiriir Oregon ODDS lambarka 503-945-5811 ama dd.directorsoffice@odhsoha.oregon.gov. Waxaanu aqbalnaa wicitaanada dhammaan noocyada adeegga gudbinta ee loogu talagalay dadka Dhegaha La', Maqalka Ku Adag Yahay, Dhegaha iyo Indhaha La', dadka aragga la' ama araggoodu hooseeyo. Si aad u hesho wixii macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan bixiyeyaasha adeegga gudbinta booqo https://www.oregonrelay.com ama https://www.fcc.gov/general/internet-based-trs-providers.